

### **503.00 MAQNAANSHAHA IYO CUDURDAARKA ARDAYDA**

Carruurta ka maqnaata iskuulka sababo jirro awgood ama sababo kaleba waa in ay ula yimaadaan macalinka cudurdaar qoran oo ka socda waalidka ama qofka mas'ulka ka ah kahor inta aan dib loogu ogolaan fasalada.

Ardayda cisbitaalka ilkaha ee iskuulka ka qaadanaya daaweynta ilkaha, ama daaweyn caafimaad ka helaya dhakhtarada ka hawl gala xafiiska adeegga caafimaad ee iskuulka waa loo cudur daari karaa muddada laga maarmaanka ah.

Ardayda waxaa si kumeel gaar ah looga cudurdaari karaa ka qaybgalka fasalada aqoonta habdhiska jirka haddii ay la yimaadaan codsi ka socda waalidka ama kalkaaliye caafimaad. Sidoo kale ardayda waa looga cudurdaari karaa ka qaybgalka fasalada aqoonta habdhiska jirka waqti dheer haddii ay la yimaadaan bayaan cad oo ka socda dhakhtarka qoyskooda taasoo bixinaysa baaritaan qeexan, sababta cudurdaarka, iyo dhererka waqtiga uu ardaygu ka maqnaan doono casharrada.

Ardayda lama siin doona cudurdaar aysan ku imaan fasalada haddii ay ka qayb qaadanayaan casharro ku saabsan muusiko, qoob-kaciyaar, ama waxqabad kale oo aan la xiriirin iskuulka.

**TIXRAACYO CELIN:**

**TIXRAACYO SHARCI:**